*Översatt från svenska till somaliska*

# Xannaanada carruurta ee degmada Västervikar



VÄSTERVIKS KOMMUN

## Ku soo dhawow xannaanada carruurta ee degmada Västervik!

Galkan waxaan ku soo ururinay warbixinno ku saabsan xannaanada Carruurta ee degmada Västervik. Waxaana laga dhex helayaa warbixinno gundhig u ah sida ay xannaanadu u shaqayso iyo halka aad ula noqonayso adiga oo ah qof aan ka ogayn in badan xannaanada sida ay u shaqayso.

## Waa maxay xannaanadu maxaase haga howlaha xannaanada?

Xannaanadu waa in ay noqotaa meel ay ka helaan carruurta oo xiiso leh , nabdoon iyo meel carruurta tagtaa ay wax ku bartaan. Carruurtu waa in la siiyaa fursad ay wax ku bartaan iyaga oo ciyaaraya oo wax samaynaya , ama wax baadhaya – si gaar gaar ah iyo si wadareed ba iyaga oo la jooga qof wayn. Xannaanadu waa in ay aasaaska u dhigtaa waxbarashada sii socon doonta inta ka hadhay nolosha.

Xannaanadu waa nooc ka mid ah iskuulada lagu maamulo sharciga dugsiyada iyo manhajka dugsiga xannaanada. Xannaanada hawlaha ay qabato waxaa ka mid ah waxbarasho iyo waxbarid. Xannaanada waxaa jooga shaqaale tababaran. Waxay qorsheeyaan waxbaris carruurta u suurta galin karaysa in ay yeeshaan hal abuur , wax bartaan iyo in ay wax baadhi karayaan.

Barayaasha xannaanada ayaa hor mood ka ah waxbarista, laakiin waxaa kale oo jira shaqaale kale oo ka caawiya horumarka carruurta iyo waxbarashada.

## Qiyamka xannaanada

Xannaanadu waxa ay leedahay aasaas dimuqraadi ah. Ilmo kasta waxa uu leeyahay mudnaantiisa sida kuwa kaleba u leeyihiin mudnaan taa la mid ah.

Xannaanadu waxa ay astaan u noqonaysaa rabbaynta, xannaanaynta iyo waxbarista guud ahaanba. Taas micnaheedu waa in ay xannaanadu ay tahay halka ugu horraysa ee ilmahaagu uu wax ka bilaabayo. Iyada oo kuu suura galin karaysa in aad shaqayso ama aad wax barato.

Manhajka waxa ku yaal in ciyaartu muhiim u tahay horumarka carruurta iyo waxbarashadooda.
Shaqaaluhu waxa ay tixgalinayaan carruurta aragtidooda, xiisahooda iy waaya-aragnimadooda marka ay qorshaynayaan hawl maalmeedka. Carruurtu waxa ay isku dayayaan in ay isu muujiyaan siyaabo kala duwan , gaar ahaantood iyo iyaga oo la jooga kuwa kale. Waxaana lagu muujin karaa hees, muusik, sawir , qoob ka ciyaarka, riwaayadaha ama hadalka iyo qoraalka.

Carruurtu waxa ay fursad u helayaan in ay horumariyaan aqoonsigooda iyo dhaqankooda. Horumarinta luuqadda ee carruurtu waa muhiim. Xannaanadu waxa ay ka caawin doontaa carruurta ku hadasha afka hooyo ee aan kan iswidhishka ahayn fursad ay ku bartaan af iswidhishka iyo afkooda hooyo. Xannaanada carruurtu waxa ay ka hortagaysaa doorka dhaqanka ee jinsiga. Dhammaan gabdhaha iyo wiilasha waa in la siiyaa fursad isku mid ah oo ay ku horumariyaan awoodahooda xannibaad la’aan.

## Ku soo dhawoow xannaanada carruurta ee degmada Västervik!

Västervik waxaa ku yaal xannaanooyin hoos yimaada degmada iyo kuwo gaar loo leeyahay labadaba. Xannaanooyinka madaxa bannaan waxa ay raacaan xeerar la mid ah xannaanooyinka hoos yimaada degmada.

Waxa aad ooga dalbi kartaa ilmahaaga boos uu ka helo xannaanada adiga oo u maraya adeegga deg-degga ee degmada.

Haddii aad tahay qof ku cusub waddanka, waxaa kaa caawin doona isku dubaridaha si aad boos uga codsato xannaanada. Isuduwaha ayaa waliba kaa caawin doona dugsiga aad dooranayso.

## Xannaanada iswidhishka

Xannaanadu waa goob aan qasab ahayn looguna tala galay carruurta da'doodu u dhaxayso 1 illaa 5 sanno.Xannaanada ka dib waxa uu ilmuhu bilaabaa dugsiga lix jirrada , dugsiga hoose ka dibna dugsiga sare.
Inta badan carruurta iswidhan waxa ay tagaan xannaanada. Carruurtu xannaanada waxa ay ku bartaan qaabab ciyaaro iyaga oo la ciyaaraya carruurta kale ee la dhigata xannaanada, tusaale ahaan, way heesaan, rinjiyeeyaan, qoob ka ciyaaraan, wax bay qoraan wayna hadlaan, waxa ay ku hadlaan afkooda iyo kan siwidhishka labaduba.  U oggolaanshaha ilmahaagu inuu tago xannaanada waa hab loogu diyaarinayo dugsiga uu billaabi doono.

## Goorma ayuu ilmuhu tegi karaa xannaanada?

Ugu horrayntii carruurta oo dhami waxa ay xaq u leeyihiin in ay tagaan xannaanada saddex saacadood maalin walba laga bilaabo ogosto goortuu ilmuhu buuxiyo 3 sanno.

Intaas waxaa sii dheer carruurtu waxa ay xaq u yeelan karaan xannaanada laga bilaabo 1 sanno jir. Laakiin waa marka adiga oo waalid ah aad ku hawlantahay shaqo ama aad tahay shaqo raadis, waxbarasho ama aad ku jirtid fasaxa waalidnimo carruur da' yar yarna ay kuu joogaan.

Haddii aad tahay qof shaqo doon doon ah ama aad ku jirtid fasaxa waalidnimo haystana carruur yar yar ilmahaagu waxa uu xaq u leeyahay inuu tago xannaanada 15 saacadood todobaadkii.

Carruurta sidoo kale waxa ay xaq u yeelan karaan xannaanada haddii ilmuhu leeyahay baahiyo gaar ah oo la xidhiidha xaalada qoyska ama sababo jidh ahaaneed, maskax ahaaneed ama sababo kaleba oo keenaysa in uu u baahdo caawimaad gaar ah.

## Muddo intee le’eg ayuu qofku sugayaa in ilmuhu bilaabo xannaanada?

Xannaanada waa in lagugu casuumaa 4 bilood gudahood marka aad soo gudbiso codsiga, haddii ilmuhu buuxiyo 1 sanno iyo shuruudaha kale ee laga doonayo.

Waxaan kugu casuumi karnaa mid ka mid ah xannaanooyinka degmada. Taa micnaheedu waa iyada oo aan la hubin in ilmahaagu uu ka helayo boos halkii aad ka dalbatay muddo 4 bilood gudahood ah. Haddii aad diido casuumad aad heshey waxa aad sugi doontaa xilli dheer si aad u heshid boos cusub.

Maamulka degmadu waxa ay isku dayi doonaan in ay ooga helaan ilmahaaga boos meel u dhow halka aad dagantahay.

## Hordhaca xannaanada

Markuu ilmuhu bilaabayo xannaanada waxaa laga doonayaa waalidku in uu ka qaybqaato howsha xannaanada isaga iyo ilmihiisuba si ilmuhu u dareemo daganaansho una barto shaqaalaha iyo carruurta kale. Inta lagu guda jiro hordhaca sidoo kale waxa aad xoog ogaal u noqon doontaa sida ay xannaanadu u shaqayso.

## Waa imisa kharashaadka xannaanadu?

Laga bilaabo ogosto sannadka uu ilmuhu buuxiyo 3 sanno, waa u bilaash in lagu hayo xannaanada saddex saacadood maalintii.

Haddii ilmuhu u dhexeeyo 1 illaa iyo 3 sanno , waxa ay ku kacaysaa joogistiisu lacag. Haddii ilmuhu ka weyn yahay 3 sanno oo uu aado xannaanada in ka badan saddex saacadood maalintii isaguna lacag ayay noqonaysaa joogistiisu. Inta ay lacagtaasi noqonayso waxa ay ku xidhan tahay dakhliga soo gala reerka.

Marka aad ilmahaaga u codsonaysid boos waxa aad sheegaysaa wadarta dakhliga qoyska soo gala. Haddii aadan sheegin dakhliga idin soo gala waxa aad bixin doontaa lacagta ugu sarreysa.

Degmada Västervik ayaa leh jaan goynta qiimaha. Taa micnaheedu waxa weeyaan in ay jirto xad go’an oo aad bixinaysid.

## Luuqadaha badan ee xannaanada

Xannaanadu waxa ay ka caawisaa carruurta hormarinta afka hooyo siyaabo kala duwan. Tusaale ahaan sida in la siiyo fiiro gaar ah luuqadda, dhaqanka iyo waddamada. Waa muhiim in la muujiyo in dhammaan afafku isku qiimo yihiin. Carruurtuna waa in ay fursad u helaan in ay adeegsadaan dhammaan afafkooda.

Xannaanadu waxa ay siisaa carruurta afkooda hooyo aanu ahayn iswidhish fursad ay ku hor marin karaan labada afba kan iswidhishka iyo afkiisa hooyo. Laakiin carruurta xannaanada tagtaa xaq uma leh dhigashada afka hooyo. Waxa ay heleyaan fursadaa marka ay tagaan dugsiga hoose oo ay koraan carruurtu.

Cilmi baadhis ayaa muujisay carruurta helay fursad ay ku hormariyaan afkooda hooyo in ay sidoo kale ay ku wanaagsanaadeen barashada afka iswidhishka. Sidaas awgeed waa muhiim in uu qoysku adeegsado afka hooyo goorta aad la hadlaysaan carruurtiina.

## Sidee adiga iyo xannaanada aad uga wada shqayn kartaan sida u wanaagsan ilmaha

Waalidku muhiim buu u yahay xannaanada. Manhajku waxa uu sheegaa in shaqada xannaanadu ay horseed u noqoto wada shaqayn dhow iyo kalsaooni abuurid ay la yeelato waalidiinta guryaha jooga.

Sidaa darteed, waa muhiim in aad la hadasho shaqaalaha haddii ay jiraan wax aad maanka ku haysid. Waqtiga ugu fiican waa marka aad  gaynaysid ama aad soo kaxaynaysid ilmahaaga. Markaas shaqaaluhu waxa ay kuu sheegi doonaan sida ilmahaagu ahaa maalintaa ama intii uu joogay xannaanada. Sidoo kale waad sheegi kartaa haddii ay jiraan wax gaar ah oo aad jeclaan lahayd in ay ogaadaan shaqaalaha.

Waxaa kale oo aad heli kartaa fursad aad kula kulanto oo aad kula hadasho shaqaalaha adiga oo kala hadlaya xaaladaha ilmahaaga haddii uu ilmahaagu ku faraxsanyahay xannaanada oo uu samaynayo horumar iyo haddii ay xannaanadu si wanaagsan u shaqaynayso. Kala hadal shaqaalaha haddii aad u baahantahay kulan noocan oo kale ah.

## Tusaalooyinka qaarkood ee maankaaga ku soo dhici kara oo aad ka fikiri kartid

- Waxaad u baahtahay in aad soo gudbiso jadwal ku saabsan sida ilmahaagu u tagayo xannaanada. Tani waxa aad ku samaynaysaa adiga oo adeegsanaya IST ama waxaad u dhiibi kartaa shaqaalaha jadwalka oo warqad ah.
- Haddii ay jiraan wax isbedelo ah oo waqtiyada aad ilmahaaga gaysid xannaanada aam aad ka soo kaxaysid, waxa aad u baahantahay inaad la socodsiisid oo aad u sheegtid shaqaalaha xannaanada sida ugu dhakhsiinyaha badan ugana suurtagalsan.
- Marka uu ilmuhu xanuunsanyahay ilmuhu waa in uu guriga joogaa waana inaad wargalisaan shaqaalaha xannaanada in ilmahaagu uu xanuunsanyahay oo uusan imaanayn. Waydii shaqaalaha goorta uu iman karayo ama uu ku soo noqon karayo xannaanada.
- Haddii aad fasax tahay ilmuhu waxa uu kula joogayaa guriga.
- Dibed joogu waa qeyb ka mid ah howl maalmeedka xannaanada sannadka oo dhan (xitaa marka roobku da’ayo ama barafku da’ayo).Sidaas awgeed ilmuhu wuxuu u baahan yahay dhar ku habboon hadduu joogo gudaha ama dibadda.
- Haddii aad wax su’aalo ah qabtid ama aad ka walwalsantahay wax ku saabsan ilmahaaga la hadal shaqaalaha xannaanada.

## Waan ku salaamaynaa adiga iyo ilmahaagaba waxaadna ku soo dhawaataan xannaanada !

## Nagala soo xidhiidh

Barn- och utbildningsförvaltning
Fabriksgatan 21
593 80 Västervik
Barn.utbildning@vastervik.se
www.vastervik.se